



# Guurka Hore ee Khasabka ah

Ku khasbida qof inuu guursado waa dembi khatar ah Australiya gudaheeda.

Australiya gudaheeda, dadku xor bay u yihiin inay guursadaan. Badanaa, qofku waa inuu ka weyn yahay **18** sanno jir si uu si sharci ah ugu guursado. Xaaladaha qaarkood qof ka weyn da'da 16 wuu guursan karaa, laakiinse tani waxay u baahan tahay amar maxkamadeed.

Qofku waa inuu ogolaadaa guurka iyadoo aan la khasbin lana khiyaameyn.

Guurka la soo qalqaaliyo, halkaas oo ay labada qofba si xor ah isuguursadaan, wuu ka duwan yahay guurka xoogga ah. Guurka laysu soo qalqaaliyo sharci buu ka yahay Australiya gudaheeda.

Haddii adiga ama qof aad taqaan uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.  
Boliiska Australiya waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo la talin qarsoon oo bilaash ah ka wac **1800 RESPECT 1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

Waa sharci darro inaad ugu kaxeeyso ama ugu dirto qof dal kale guur xoog ah ama in qof kale kuu qabanqaabiyo taas.

Guurka hore ee khasabka ah wuxuu marmarka qaarkood ku xiran yahay u soo kaxeeynta dad dal kale ama xudduudo dhaafinta iyadoo ay rabitaankooda ka soo horjeedo, taasina waa sharci darro.

Miyaad adigu ama qof aad taqaan, khatar ku jirtaan?

Ka wac Boliiska Dawlada Dhexe ee Australia ( **Australian Federal Police (AFP)** ) **131 237**. AFP waxay ku siin kartaa tallada bilowga ah waxayna taageero u gudbin kartaa dhibanayaasha guurka hore ee khasabka ah ama ka ganacsiga dadka, ay ku jirto hoy, taageero lacageed, tallo sharciyeed iyo la tallin.

Wixii macluumaad dheeraad ah raac xiriirka bogga internetka AFP ee **www.afp.gov.au**.

Waxaa jira adeegyada kale oo ku caawin kara Australiya gudaheeda.

**1800 RESPECT** waa adeega La talinta Qalalaasaha Qoyska iy Qoyska Waxyeelada Galmada Qaranka ee Australia ( Australia's National Sexual Assault, Family and Domestic Violence Counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin internetka ah iyo taleefanka oo qarsoon bilaashna ah. La taliyayaasha way ku dhageysan doonaan, su' aalaha ayey ka jawaabi doonaan waxayna kuu gudbin karaan adeegyada kale ee taageerada ee xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama gal website ka 1800 RESPECT ah **www.1800RESPECT.org.au**.

Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac Adeega Turjumaada qoraalka iyo Afka (**Translating and Interpreting Service (TIS)**) bilaash ahaan **131 450**. TIS ayaa kaa caawin karta si aad ula hadasho adeegyada kale. TIS ma bixiso la tallin.



## Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan guurka khasabka ah iyo ka ganacsiga dadka:

Raac xiriirka bogga internetka Wasaaradda Xeer ilaaliyaha Guud ( Attorney-General's Department) ee ah [www.ag.gov.au](http://www.ag.gov.au).